Khabiirada oo Khibradda leh: Rawasia iyo khibradeeda dib u dejinta

Akhri wareysigeena aan la yeelanay Rawasia – gabar dhalinyaro oo cajiib ah oo nala wadaageyysa anaga sida ay ugu heshay qoyska kooxda Community Sponsorship.

Qorshaha dib u dejinta dhalinyaro ahaan waxaa ka buuxi kara caqabado aas u adag, oo ay ka mid yihiin saaxiibada aad weyso, aad weeydo waxbarashadaada iyo inaad gurigaaga aad weydo. Tani waxaa sii dheeer, waxaad ku dadaaleysaa inaad ka bilowdo nolol cusub waddanka ku martigelinaayo oo waxaa laga yaabaa inaadan dareemin inaad guriga joogtid, ama aad dareemeyso inaad rabtay. Tani waxay ahayd khibradda Rawasia, mida ay ka soo gudubtay iyada oo muujineysa geesinimo iyo adkeysi, oo ay farxad ku qaadaneyso sheyada yar taas iyada ay awoodo, sida farshaxankeeda.

Wareysigaani, Rawasia waxay u fadhiisatay inay nooga sheekeyso waayo aragnimadeeda ee dhibaatooyinka ay ku soo martay qaxootiga, iyo sida ay ugu soo gudubtay dib u dejinta iyo taageerada ay ka heshay kooxda Community Sponsorship.

Sidee dareentay ka soo tagidda waddankaaga hooyo ee Siiriya oo aad u soo guurtay Ciraaq?

Waxay dareemeen isbedel weyn, oo culees xad dhaaf ah. Waxwalba way bedelnaayeen, luuqadda way bedelneed, oo runtii waxaan dareenay farqiga u dhaxeeya bishii ugu horeysay ee Cirqqa gudaheeda. Halkaas waxay ku hadlaan luuqadda Kurdhiishka. Kuma aanan nooleen qaybta Carab ee Ciraaq, waxaan ku nooleen qaybta Kurdhiishka, meeshaas oo ayaga aan ku hadlin wax Carabig ah. Waxay ahayd mid, aad u adag si meeshaas leesku daro ama leesku dhexgalo. Waxaan dareenay inay ayaga ay na jecleen, waxaan dareenay in meeshaas nalaga rabin.

Oo markii aan jiray halkaas, ka hadalka kurdhiiskeyga ma dhammaantiis ma wanaagsaneen. Marwalba waxaan isku deyi jiray si aan u fahmo laakiin wuxuu ahaa mid adag. Waxaan halkaas ku bartay labo sanno si aan u fahmo luuqadda si fiican,

laakiin bilowgii runtii wuxuu ahaa mid adag. Dhaqankana wuxuu ahaa mid ka duwan kii aan arki jirnay. Tusaale ahan, waxay leeyihiin ciido qaas ah taas oo anaga aan u dabaal degin. Oo waxay xirtaan maryo kala duwan ciidahooda, oo ka duwan wixii caadi ahaan aan u xiran jirnay.

Waxbarashadeyda way saameysay, maadaamaa ay ahaayeen dugsiyada Carabiga kuwa gaar ah, oo waa inaan bixinaa lacag badan si aan u dhigano. Oo waxoo kale lacag aan ku bixineynay si aan u qaadano basaska ee dugsiga sababtoo ah wuxuu ahaa mid fog. Laakiin markii meeshaan aan ku gaaray sannadkii sagaalaad, ma aan awoodin inaan bixino lacag dugsiga sidaas darteeda waxay ahayd inaan ka baxo dugsiga. Waxaan dugsiga ka maqnaa ugu yaraang hal sano iyo bar. Qof kale oo ahaa saaxiibkeyga sidoo kale wuu ka baxay dugsiga. Ka tagidda dugsiga waxay iga dhigtay inaan dareemo runtii nafsadeyda mid aad ugu xumaado. Oo kuma baran karin guriga maadaamaa aan haysanin buugaagta manhajka dugsiga, maadaamaa ay ahaayeen kuwa aad qaali u ah, sidaas darteeda ma awoodi karin ayaga. Marka, waxa aan taas bedelkeeda sameyn lahaa waxa waaye inaan qoro sheekooyinka iyo inaan sawiro farshaxankeyga. Noocyada sheekooyinka aan qori lahaa waxay noqon lahaayeen sheekooyin khiyaali ah, sheekooyin ku saabsan amiiradaha iyo sheekooyinka cirfiidka ah.

Sidee dareentay markii koowaad ee aad maqashay inaad dib u dejin UK ugu socotid?

Ma seexanin karin saddex beri sababtoo ah waxaan aad u dareemay farxad iyo raynrayn! Maskaxdeyda waxaan ku haayay inay, UK inay tahay waddanka ugu fiican ee adduunka. Waxaan qiyaasaayey waxa ay noqon doonto nolosha sida halkaan, mustaqbalka aan haysan karo halkaan, iyo mustaqbalka qoyskeyga. Waxaan ahaa qof aad ugu farxay waxbarashada sababtoo ah way ka duwan tahay halkaan, iyo nidaamka jaamacadda way ku duwan tahay halkaan. Laakiin sheyga igu mihiimsanaa aniga waxuu ahaa inay tahay halkaan meel ammaan ah. Waxaan dareemaa halkaan ammaan. Siiriya, dugsigeyga waa la duqeeyay, oo labo ka mid ah saaxiibadeyda ayaa lagu dilay duqeentaas.

Maalinta aan imaanay UK, aad ayaan u gaajeysneen oo aad ayaan u daalneen. Oo markaas ka dib kooxda waxay na keeneen gurigeena, waxaan arkay cunto oo saaran miiska oo anaga naloo diyaariyay oo wuxuu ahaa cuntada Siiriyaanka. Runtii ma garaneynin sida aan ku dhaho karo waad mahadsan tahay kooxda waxaas noo sameeyeen. Waxay ahayd tamar fiican oo ay ku jirto guriga, oo waxay naga cawiyeen inaan si nabad ku joogno. Xitaa woqtiyada aan dareeno murug, marwalba waxay naga caawiyaang inay soo saaraan waxa ugu wanaagsan ee gudaheena ku jira. Waxay iga dhigeen qof xoogan, ka dib wax walba oo dhacay.

Waxaad joogtay hadda UK muddo labo sanno ah. Labadaas sanno sidee ayay ahaayeen?

Labada sano halkaan aan joognay runtii, way wanaagsaneed runtii. Bisha ugu horeysay ee joognay halkaan, waxay ahayd mid dhib leh laakiin keli waxay ahayd luuqadd xumada, laakiin ka dib waxwalba markay bilowdeen waxay noqdeen kuwa fudud.

Markaan imaanay UK, ma laheen wax aabbo ah. Sidaas darteeda, kooxda waxay iga dhigeen inaan dareemo waxay isiinaayeen aniga booska aabbo oo aan waayay. Waxay ahaayeen saaxiibadeena, qoyskeen, aabbo, ayeeyo, awoowe, – waxwalba! Waxwalba ayay noo ahaayeen halkaan.

Woqtigaan xaadirka ah waxaan tabarucaad ahaan ugu shaqeeyaa dukaan samafalka ah, oo waxaan sidoo kale iskaa wax u qabso ugu shaqeeyaa naadiga dhalinyarada oo wata carruuta yar. Waxaan go'aansaday inaan tabaruco sababtoo ah markaan u baahnaa caawinaad waa dadka i caawin jiray iyaga. Oo waxaan dareemay inay tahay tookadeyda si aan u caawiyo dadka kale kuwaas oo u baahan caawin.

Bilaawista dugsiga cusub sidee ayuu ahaa?

Bilaawista dugsiga cusub ee ku yaala UK wuxuu ahaa mid aad u adag bilowgiiba sababta oo ah caqabadda luuqadda, laakiin waxay noqotay mid ii fududaatay caawimaada aan helaayo awgeed iyo dadka saaxiibada la ah dartooda. Macallamiinteyda runtii in badan way i caawiyeen. Mar kasta oo aan u baahdo caawin ama aan fahmin erey Ingiriiska ah kaas oo la isticmaalay, way ii sharxaaeen isaga, waxayna ku qoraan sabuuradda, wayna igala hadly jireen ereygaas.

Waxaan sameystay saaxiibo kuwaas oo aan la hadlo maalin walba, saaxiibo aan la kulmay sannadkii sagaalaad halkaan, markaan ku celiyay sannadkii sagaalaad. Iyo hal saaxiib, waxaan noqonay saaxiibo aad iskugu fiican markaan isbaranay hal bil ka dib. Hadda waxaan ku jiraa sannad tobnaad, marka waxaan isku diyaarin doonaa dhowaan imtixaankeyga GCSE-ga. Marka ugu horeysay fikirka imtixaannada GCSE-ga wuxuu i dareensiiyay cabsi, laakiin ka dib waxaan oggaaday inuusan cabsi badan laheen, oo keliya waa inaan xaqiijiyaa inaan wax ku barto saacado dheeraad ah dugsiga ka dib, oo ka dib waan fiicnaan doonaa. Waxaan jeclahay waxbarashada fiidkii iyo haweenkii maadaamaa ay tahay mid degan,

marka ay ku xiran tahay sida aan iskugu deyay aniga, waxaan baran doonaa hal sac ama labo sac ka hor inta aan seexanin.

Markaan joogo UK, waxaan dareemaa inaan joogo waddankeyga, sida kani waa waddankeyga oo kale. Gaar ahaan sababtoo ah hadda waxaan ku hadlaa luuqadda halkaan. Mar hadaad la qabsato luuqadda, tani waxay kaa caawin doontaa oo aad dareemi doontaa sida inaad joogto waddankaaga adiga aad leedahay, oo waxaad yeelan doontaa dareemo inaad halkaan aadba leedahay.

Way adag tahay laakiin waa inaad naftaada dhiirigelisaa oo waa inaad wax bartaa, runtii waa inaad wax barataa. Maalin walba, haddii aad barato shan erey, ka dib Ingiriiskaaga wuu fiicnaan doonaa sannadka ugu horeeyo. Xitaa mudadii uu cudurka bilowday markii ugu horeysay, muddadaas waxaan joogay guriga dugsigana wuxuu ahaa oo keliya fasalada khadka tooska ah. Marka, fasal walba, Waxaan hoos ku qori jiray labo ama saddex erey. Iyo sababtoo ah maalin walba oo aan ku hiro keliya guriga, waxaan hubineyaa inaan caajisin, oo maalin walba wax baran doono. Iyo dhammaadka todobaadka, Waxaan naqtiin ku sameyaa dhammaan ereyada oo waxaana ka sameeyaa jumlado iyaga. Oo haddii aad sameyo sheyadaan, ka dib Ingiriiskaaga wuxuu noqon doonaa mid aad u fiican. Dareenkaas, cudurka ayaa iga caawiyay oo igu dhiirigeliyay aniga si aan wax ugu barto guriga.

Waa maxay hadafyada mustaqbalkaaga?

Ka hor intaan ku fikirin waxaan rabay inaan noqdo dhakhtarka qaliinka sameeya. Laakiin hadda waxaan dareemeyaa 80% inaan noqdo dhakhtarka qaliinka sameeya, iyo 20% waxaan rabaa inaan noqdo duuliye! Laakiin waxaan u maleynayaa inaan go'aansan doono inaan noqdo dhakhtarka qaliinka sameeyo ugu dambeyntii.

Waxaan rabaa inaan aado Jaamacad, waxaa laga yaabaa inaan aado Liverpool, Oxford ama Cambridge! Laakiin si daacad ah, waxaan jeclahay Liverpool sababtoo ah waa guriga. Oo waxaan hadda jeclahay lahjadda halkaan, aad bay iigu fududaaneysaa si aan u fahmo. Saddexda bilood ugu horeysa halkaan, Waxaan ogaaday dadka ku nool Liverpool sida ay ugu dhawaaqayaan xarafka ‘r’, iyo sida ay u dhahayaan ereyga sida ‘where’. Laakiin markaan booqday Manchester, waxaan ogaaday lahjadda halkaan inay adag tahay si loo fahmo, sidaas darteeda waxaan aad u jeclahay Liverpool! Runtii waxaan jeclahay lahjadda Scouse, oo waxaan jeclahay inaan barto qaabka dadka ku nool Liverpool ay ugu hadlaan.

Wax kale miyaa jira inaad nala wadaagto?

Dadka i caawiyay aniga. kooxda Community Sponsorship. Waxaan rabaa inaan dhaho waad mahadsan tahay. Mahadsanid. Waxaan idinkaga mahad celineyaa qalbigeyga. Runtii magaranaayo waxa aan sameyn lahaa haddaadan i caawin laheen. Sida mar hore aan sheegay Aniga, kooxda waxa waaye qoyskeena halkaan. Gaar ahaan waxay noo ahaayeen aabbo anaga. Ayaga waxwalba ayay noo ahaayeen, oo ka mid ah macllamiinta, lataliyaal, bogsiyaal.

Waxaan dhihi lahaa qoysaska kale ee dib u dejin u heleen UK waxba haka welwelina. Bisha ugu horeysa waxay noqon doontaa mid adag laakiin waa inaad barataa luuqadda, ka dib waxaad dareemi doontaa fiicnaan haddii aad sii wadato waxbarashada.

Aad baad u mahadsan tahay Rawasia!